

CORONAVIRUS - Jura



- Waxay masuuliyiintu idiiin sheegayaan inaad joogtaan guryihiiна sida ugu macquulsan joojisaana isdhexgalka bulshada si loo yareeyo faafitaanka VIRUSKA.
- Si loo hakiyo ama loo joojiyo VIRUSKAN, Ispitaalaadkana ay u helaan fursad ay ku daaweeyaan bukaanada waa inaad tiixgelisaan awaamiirta Masuuliyiinta Gobolka.
- Ku dhaqanka sharciyadan waxay kaa badbaadineysaa VIRUSKA adiga iyo qaraabadaadaba,
- Hadii aad jiran tahay waa inaad joogto hoygaaga kana fagoow dadka kale.
- Hadii aad qufacayso ama ay qandho ku hayso telephone u dir dhaqtarkaaga talooyinka uu kusiiyana raac.
- Haday sii xumaado xaaladaada caafimaad tusaale ahaan aadan awoodin inaad si caadi ah u neefsato waxaad wacdaa dhaqtarkaaga, talooyinkiisana raac.
- Hadaad u malayso inaad jiran tahay iyo wixii su ‘aalo caafimaad ah waa inaad wacdo Numberka HOTLINEKA Gobalka oo ah 032 420 51 71 hadii lagaa qaban waayo ku celi mar labaad.
- Masuuliyiintu waxay kuu sheegayaan inaadan ka bixin guriga hadaysan muhiim kuu ahayn.
- Hadii aad ka baxdo guriga waa inaad iska ilaalso u dhawaashaha dadka iyo meelaha ay ku badan yihiin.
- Waa inaad u jirsato dadka kale fogaan la eg 2 mitir islamarkaana waa inaad dhaqdo gacmahaaga saacad walba iyo markaad hoygaaga ku soo noqotaba
- Waa inaan guriga uga baxno sabab muhiim noo ah sida ayadoo adeeg la soo samaysanayo .
- Waa in layska ilaaliyo meelaha adeega bulshada, gaadiidka dadweynaha iyo meelaha laga raaco sida gareyada ama banhofyada.
- Xaga cuntada, marka hore waa in la isticmaalo Keydka lana qorsheystaa qaabka cuntada,. Hal qof waa inuu u soo adeego qoyska oo dhan hal mar wiijiiba ayadoo layska ilaalinayo saacadaha ay dadku isku badan yihiin.

- Waa in loo sameeyo adeega dadka waayeelka ah iyo kuwa ay haysato dhibaato caafimaad loona dhigo gurigooda hortiisa si loo badbaadiyo.
- Waa inaan la booqan dadka waayeelka ah ama kuwa u nugul cudurka waana inaan kula xiriirno Telephone.
- Dhamaan hawlaha wadairka bulshada sida : iskoolaadka, maqaayadaha, isportiga iyo dhaqamada waa la hakiyey ama la joojiyey.
- Taasi waxay cadayneysaa inaan la abaabulin, laga qaybgalin xafladaha noocay doonaanba ha ahaadeen sida dhalashada ama sanadka cusub.
- Xiliga maaweeelada waxaa haboon in xubnaha qoyska oo kaliya ay ku sameystaan guryahooda.
- Xagga caruurta waxaan la soconeynaa awaamiirta iskoolka.
- Waa inaan caruurta u diyaarino farsamooyin kala duwan sida : cayaarahaa wadajirka, farsamada gacanta iyo sida cuntada loo sameeyo.
- Wuxaan diyaarsan karnaa qof ilmaha haya ayadoo mudnaanta la siinayo xubnaha qoyska. Hadii loo baahdana waa loo dhiibban karaa dadka laysyaqaano ama deriska oon ka ahayn dadka waayeelka ah iyo kuwa caafimaadka xun.
- Inta ay jirin mabnuucid in banaanka loo baxo, waan soo hawo qaadan karnaa si kali kali ah tusaale ahaan in lagu lugeeyo meelaha duurka ah.
- Waa inaan iska ilaalino jardiinooyinka iyo la kulanka qoys kale iyo tiro caruur ah.